Su'aalaha Sida Joogtada ah La isku Wayddiiyo ee Lama-daayada (FAQs)

Qaybtan waxay ka hadlaysaa "Su'aalaha Sida Joogtada ah la Isku Wayddiiyo" ee ugu sareeya eena khuseeya qaybaha sida Isticmaalka Kaarka Garashada leh ee Guud, Lacag ku shubidda kaarkeyga garashada leh, Qasaaladaha iyo Qallajiyeyaasha, Isticmaalka Habboon ee Saabuunta, Lacag-celinada, iyo Arrimaha Adeegga Guud.

Isticmaalka Kaarka Guud ee Garashada leh

Waa maxay kaarka garashada leh?

Kaarka garashada leh wuxuu si aad ah ugu egyahay kaarka deenta ee leh xalleef yar oo ay ku xardhantahay xog kumbuyuutar. Lacag caddaan ah ayaa loogu kaydsan karaa si qiimo elektaroonig ah xalleefkan yar ee ku xardhan xogta. Marka aad kicisid makiinadaha lama-daayada, qiimaha dhaqmada ama qallajinta waxaa laga goynayaa baaqiga kaarkaaga.

Waxaan ahay degene degan dhisme leh barnaamijkiina kaarka garashada leh. Sideen u heli karaa kaarka garashada leh?

Fadlan la u tag Maamulaha Dhismahaaga si aad u heshid kaarkaaga garashada leh. Waa in ay ku siiyaan kaarka garashada leh marka lagu siinayo fureyaasha gurigaaga.

Sideen u eegi karaa baaqiga kaarkeyga garashada leh?

Dhammaan qasaaladaheena iyo qallajiyeyaasheena kiciya kaarka garashada leh waxay soo bandhigayaan baaqiga kaarkaaga marka kaarka la geliyo makiinadda. Waxaad sidoo kale ka eegi kartaa baaqiga kaarkaaga Aalad kasta ee dib-ugu-shubta Deynta/Ammaahda ama Aaladda Dib-ugu-shubta Lacagta Caddaanka ah Kaarka adigoo kaliya gelinaya kaarka aaladda.

Maxaa dhacaya haddii aanan ku haysan lacag kaafi ah kaarkeyga garashada leh marka aan dharkeyga dhaqanayo?

Marka aad geliso kaarkaaga garashada leh qasaaladaha, qallajiyeyaasha kasta ee kiciya karaka garashada leh ama xarumaha dib-ugu-shuba lacag kaarka, qiimaha ku harsan kaarkaaga garashada leh waa la soo bandhigayaa. Haddii aadan haysan lacago kaafi ah si aad u shidatid makiinadda, waxaad lacag ugaga soo darsan karta Xarun kastoo Dib-ugu-shubta lacag Kaarka Garashada leh.

Maxay u jirtaa xadiddaada $50 ah ee kaarka?

Xadiddaadan waa in lagugu dhawraa haddii ay ku dhacdo lumid ama xatooyo lama filaan ah kaarkaaga. Fadlan waa in aad ula dhaqantaa kaarkaaga garashada leh sida lacaga caddaan oo kale. Haddii uu lumo, kaliya ma kaalumin kaarka, balse waxaa kaa lumay qiimaha ku jira kaarka.

Waxaan u guurayaa dhisme cusub ee isticmaala kaararka garashada leh. Ma isticmaali karaa isla kaarka?

Maya. Kaararka waxaa loo soo barnaamisheeyay in ay gaar u ahaadaan dhisme kasta sidaas awgeed, looma kala wareejisan karo dhismayaasha. Fadlan isticmaal qiimaha ku harsan kaarkaaga garashada leh kahor inta aadan guurin waxaad kaarkaaga u soo celisaa Maamulaha Dhismaha marka fureyaashaada aad soo celinaysid. Waxaad ka helaysaa kaarka garashada leh oo cusub maamulka dhismahaaga cusub.

Kaarkeyga garashada leh wuu lumay ama waa la xaday. Sideen u heli karaa mid cusub?

Fadlan ku soo wargeli kaargaaga garashada leh ee la xaday ama lumay Maamulaha Dhismahaaga. Haddii ay dhacdo in qof uu soo celiyo, way kuu soo celin karaan

adiga. Isla markaasi, waxaad u baahan tahay in aad ka qaadatid kaarka garashada leh ee cusub Maamulaha Dhismahaaga.

Kaarkeyga garashada leh kuma shaqeynayo makiinadda. Maxaan sameeyaa?

Waxaad u baahan tahay in aad go'aamisid haddii kaarkaaga uu cilladaysan yahay ama haddii makiinadda aad isticmaaleysid aysan shaqeynaynin. Ku day kaarkaaga garashada leh makiinad kale oo ka duwan. Hubso in kaarka garashada leh si buuxda oo habboon uu u gashan yahay kaar akhriyaha. Haddii uusan wali shaqeynaynin, fadlan soo wac 1-800-561-1972. wakiiladeena Adeegga Macmiilka waxay raalli ka noqonayaan in ay ku siiyaan kaar beddel ah. Waxay qaadanaysaa 5 maalmood oo kuwa shaqada ah si ay u soo saaraan kaarka beddelka ah. Haddii aad u baahatid kaarka garashada leh oo ku meelgaar ah fadlan ka codso mid maamulka dhismahaaga.

Kaarkeyga garashada leh wuxuu ku dhegay gudaha makiinadda. Sideen uga soo saarayaa?

Fadlan wac 1-800-561-1972. Waxaan soo diraynaa farsamo-yaqaan adeeg si uu dib ugu soo bixiyo kaarka kadibna uu ugu celiyo kaarka Maamulaha Dhismaha. Fadlan ka raadso Maamulaha Dhismahaaga 2 maalmood gudahood si aad dib ugu heshid kaarkaaga.

Kaarkeyga garashada leh wuxuu ku dhex jabay makiinadda. Mid beddel ah ma heli karaa?

Waxaan ka xunahay in aan maqalno in uu kaa jabo kaarkaaga garashada leh. Fadlan ka soo qaado kaar beddel ah maamulaha dhismahaaga. Haddii qayb ka mid ah kaarkaaga garashada leh uu ku dhego gudaha akhriyaha fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana soo diraynaa farsamo-yaqaan adeeg si uu u saxo dhibaatadan. Farsam-yaqaanka adeegga wuxuu dib ugu celinayaa jabka jabsan Maamulaha Dhismaha. Fadlan ka raadso maamulaha dhismahaaga 2 maalmood gudahooda.

Ma heli karaa lacag-celinta qiimaha ku jira kaarkeyga jabay?

Haddii aan awoodi wayno in aan akhrino kaarkaaga garashada leh aana xaqiijin wayno qiimaha ma awoodi karno in aan lacag-celin sameyno.

Waxaa la igula taliyay in aan nadiifiyo kaarkeyga garashada leh balse kaarka wali ma shaqeynayo. Sidee la igaaga beddeli karaa kaarkeyga?

Waxaan raalli ku nahay in aan ku siino kaar beddel ah. Fadlan wac 1-800-561-1972 Wakiiladeena Adeegga Macmiilka ee luuqadaha badan waxay raalli ku yihiin in ay ku caawiyaan. Waxaad sidoo kale u baahanaysaa in aad ku soo wargelisid kaarkaaga cilladeysan Maamulaha Dhismahaaga waxaadna ka soo qaadataa bokhshad soo celin si aad boosto ahaan dib ugugu soo dirtid kaarkaaga cilladeysan Coinamatic. Qiimaha ku jira kaarkaaga waa la xaqiijinayaa kadibna waxaa lagu siinayaa kaar cusub. Waxay qaadanaysaa 5 maalmood oo kuwa shaqada ah si ay u soo saaraan kaarka beddelka ah. Haddii aad u baahatid kaarka garashada leh oo ku meelgaar ah fadlan ka codso mid maamulka dhismahaaga.

Lacag ku shubidda kaarkeyga garashada leh ee Coinamatic

Sideen ugu dari karaa qiime kaarkeyga?

Xarunta Lacag Ku Shubidda Kaarka waa aalad loo isticmaalo in loogu shubo qiime lacageed kaarkaaga garashada leh. Waxaa jira labo nooc oo kala ah Xarumaha lacagta loogu shubbo kaarka ee la heli karo – mid oggolaanaysa lacag caddaan ah iyo mid oggolaanaysa lacag-bixinta kaar deymeedkaaga, Visa ama MasterCard. Sida caadiga ah Xarun lacag ku shubida Deynta/Ammaahda ayaa ku taalla dhismahaaga. Xarumaha Lacagta Caddaanka loogu shubo waxaa laga heli karaa meelo tafaariiqeed kala duwan haddii aad u baahan tahay in aad ku shubtid kaarkaaga lacag caddaan ah.

Halkeen uguga soo shuban karaa kaarkeyga garashada leh lacag caddaan ah?

Fadlan eeg Tilmaameha goobta ku taala Xarunta Lacagta loogu soo Shubo Kaarka si aad u oggaatid Xarunta Lacagta Caddaanka Ku Shubta kaarka ee kuugu dhow.

Ma isticmaali karaa Xarunta Kaarka loogaga soo shubo Lacagta Deynta/Ammaahda si aan u fuliyo macaamil-ganacsi?

Maya, aaladdan ay aqoonsan tahay-interac waxaa si adag loogu isticmaalaa ku shubidda qiimo lacageed kaarkaaga garashada leh.

Dib-ugu-shubaha kaarka deynta uma wareejinin qiimaha lacagta kaarkeyga garashada leh. Maxaan sameeyaa?

Fadlan eeg halka hoose ee rasiidkaaga. Haddii rasiidkaaga uu muujinayo "lama

dhammeynin" ("not completed") ama "la nasakhey" (“cancelled”), macaamilka-ganacsi wuu guul-dareystay. Fadlan dib u geli kaarkaaga kadibna isku day macaamilka-ganacsi mar kale.

Haddii rasiidkaaga uu muujinayo in macaamilka-ganacsi " la akhbaley" (“approved”), waxaa laga yaabaa in aad soo saartey kaarkaaga garashada leh inta lacagta aanan lagu shubin kaarka. Fadlan wac 1-800-561-1972. Waxaad ugu baahanaysaa rasiidka koodhka oggolaanshaha rasmiga ah, taariikhda, waqtiga iyo caddadka lacagta ee macaamilka-ganacsi. Marka la xaqiijiyo, waxaan ku siinaynaa lacag-celinta caddadka lacagta ee aanan lasoo wareejinin 5-7 maalmood ee kuwa shaqada ah gudahooda.

Haddii aad ugu baahan tahay lacago kaarkaaga, fadlan isku day macaamilka-ganacsi mar kale adigoo ka taxadiraya in aadan soo bixinin kaarka garashada leh ilaa soo bandhiga ay ka akhrinayso "ka saar" ("pull card").

Mashiinka lacagta caddaanka waxay qaadatey lacagteyda mana u soo wareejinin qiimaha kaarkeyga. Maxaan sameeyaa?

Waxaan kaa raaligelinayaa carqaladaynta. Fadlan wac 1-800-561-1972 kadibna noo sheeg magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga taleefoonka iyo lambarka taxaneha ah ee ku qoran gadaal dambe ee kaarkaaga garashada leh. Waxaa laga yaabaa in aan soo dirno Farsamo-yaqaan Adeeg si aan u xaqiijino caddadka lacagta ee aad isku dayaysay in aad ku shubtid. Marka la soo xaqiijiyo, waxaan boostada kuugu soo diraynaa kaarkaaga garashada leh iyo qiimaha la adeegsan karo ee aad isku daydey in aad ku shubtid.

Waa maxay sababta ay aallada lacagta ku shubta ay iiga qaadeysa 85 senti macaamilka-ganacsi ee kaarkeyga deynta?

Lacagta lagaa qaado waa daruuri si loo sii wado in lagu siiyo habboonaanta ku isticmaalidda kaarka deynta aaladeena lacagta ku shubta ee deynta/ammaahda.

Aaladda lacagta ku shubta ma aysan daabicid rasiid. Ma heli karaa mid?

Marmarka qaarkood aaladda lacagta ku shubta kaarka waxay leedahay arrimo waraaqo mana daabici karto rasiid. Ma awoodno in aan nuqul kaaga sameyno rasiidka macaamilka ganacsi si kastaba diiwaan ah macaamilkan-ganacsi wuxuu ka soo muuqanayaa bayaanka kaarkaaga deynta ama kaarkaaga ammaahda oo bixinaya caddaynta macaamilka-ganacsi.

Isticmaalka Qasaaladaha iyo Qallajiyeyaasha

Haddii aan doorto "Caddaano" heerkulkee ayaan helayaa?

Haddii aad dooratid "Caddaano", waxaad ku helaysaa biyo kulul wareega dhaqmada.

Ma gelin karaa bustaheyga gudaha kaga jira suufka makiinada dharka dhaqda?

Waa in marka hore eegtid warqadda ku dhegan bustehaaga gudaha kaga jira suufka si aad u xaqiijisid in shayga ay dhaqi karti makiinadda. Fadlan raac tilmaan-bixinada dhaqidda ee ku qoran warqadda ku dhegan. Qasaaladaheena dharka dhaqa ee qaybta hore dharka laga geliya waxaa ay ku habboon yihiin dhaqidda walxaha sida busteyaasha gudaha suufka kaga jira iyo kuwa caadiga ah haddii ay makiinad dhaqi karto aysana ahayn "dhaqid qallalan kaliya".

Waa maxay "Wareega-cajiibka ah ama Dhaqidda Cajiibka ah"?

Kani waa ikhtiyaar ka soo muuqda qasaaladaha dharka dhaqa badankood. 25 Senti, waxaad ku iibsan kartaa waqti dhaqin iyo biyo raacin dheeraad ah ee loogu talagalay walxaha aadka u wasakhaysan. Raac tilmaan-bixinada lagu soo dhejiyay qolka lama-daayadaada.

Waa maxay "Dusha Kore" “Top Up” ee ka muuqata qallajisada?

Qallajiyeyaasha qaarkood waxaa ku qalabeysan yihiin astaanta "dusha kore""top up". Tani waxay kuu oggolaanaysaa in aad ku iibsatid waqti qallajin dheeraad ah kaliya 25 senti. Si aad u kicisid, kaliya geli kaarkaaga garashada leh ama rubac dheeraad ah marka qallajisada ay shaqeynayso kadibna dib-u dooro hagaajintaada. Waqti dheeraad ah ayaa laguu soo bandhigayaa.

Qalabka lama-daayada wuxuu soo bandhigayaa "E06". Maxaa loola jeedaa tani?

Tani waxaa loola jeedaa in qalabka makiinada uusan awoodin in uu akhriyo kaarkaaga garashada leh. Kaarkaaga waxaa laga yaabaa in uu u baahan yahay nadiifin. Fadlan ku tirtir kaarkaaga dhar qoyan kadibna si buuxda u geli kaarkaaga makiinad kale.

Haddii kaarka uusan wali shaqeynayn, waxaa laga yabaa in aad haystatid kaar cilladeysan. Fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana raalli ka nahay in aan ku caawino.

Qalabka lama-daayada wuxuu soo bandhigayaa "E04". Maxaa loola jeedaa tani?

Kaararka garashada leh ee SmartCity waxaa ku barnaamishaysan in kaliya ay ku shaqeeyaan goobta ayaga laga bixiyay. Waxaa laga yaabaa in aad isku dayaysid in aad isticmaashid kaarka garashada leh ee uu iska leeyahay dhisme kale.

Fadlan u soo celi kaarka maamulaha dhismaha waxaadna soo sheegtaa dhibaatada. Waxay ku siinayaa kaar cusub oo aad isticmaashid.

Haddii ay lacag kuugu jirto kaarka ee aan shaqeynayn, fadlan ku soo celi kaarka xafiiskeena adigoo isticmaalaya bokhshadda kaar soo celinta ee uu bixiyo Maamulaha Dhismaha. Qiimaha lacagta waa la xaqiijinayaa kaar beddel ah oo ku jirta qiimaha lacagta ee habboon ayaa boostada laguugu soo dirayaa. Waxay qaadanaysaa 5 maalmood oo kuwa shaqada ah si ay u soo saaraan kaarka beddelka ah.

Makiinadda way joogsatey waxaana ka buuxo biyo. Maxaan sameeyaa?

Haddii qasaaladda dharka dhaqda ee aad isticmaaleysid ay tahay qasaaladda xaga hore wax ku dhaqda aadna si fudud daboolka uga qaadi kartid makiinadda, fadlan sidaasi samee kadibna sug 10 daqiiqadood. Biyaha ku jira makiinada way qallalayaan. Dib u xir makiinadda waana in la sii daayaa qufulka iridda U wareejiso dharkaaga makiinad kale. Fadlan wac 1-800-561-1972 si aad ugu soo sheegtid in makiinadda aysan shaqeynaynin waxaana soo diraysaa farsamo-yaqaan adeeg. Haddii ay suurtagal tahay, fadlan ku dhiji calaamadda (“Out of Order”) "Ma Shaqeynayso" makiinadda korkeeda.

Haddii qasaaladda aad isticmaalaysid ay tahay qasaaladda xagga kore dharka laga soo geliyo, fadlan u wareejiso dharkaaga makiinad kale. Fadlan wac 1-800-561-1972 si aad ugu soo sheegtid in makiinadda aysan shaqeynaynin waxaana soo diraynaa farsamo-yaqaan adeeg. Haddii ay suurtagal tahay, fadlan ku dhiji calaamadda (“Out of Order”) "Ma Shaqeynayso" makiinadda korkeeda.

Baaqigeyga wuxuu ku dhex xirmay qalabka lama-daayada. Sideen dib ugu helayaa lacagta?

Fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana soo direynaa farsamo-yaqaan adeeg si uu u hagaajiyo makiinadda. Wakiiladeena Adeegga Macmiilka waxay raalli ka yihiin in ay kugu caawiyaan lacag-celin kasta ee la dabakhi karo.

Qalabka lama-daayada ma oggolaanayo lacag qadaadiic ah. Waa maxay sababta?

Fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana soo direynaa farsamo-yaqaan adeeg si uu u hagaajiyo makiinadda.

Makiinada waxaa ku dhegan calaamad ah in aysan shaqeynaynin. Wax intee le'eg ayay qaadanaysaa in la hagaajiyo?

Marka wacitaan adeeg la sameeyo, makiinadda waa in la hagaajiyaa 24 saacadood gudahooda.

Arrimaha Adeegga

Qolka lama-daayadeena waa wasakh. Yaa ka mas'uul ah nadiifintiisa?

Maamulaha Dhismahaaga ama Maamulaha Hantida ayaa ka mas'uul ah nadiif ahaanshaha qolka lama-daayada. Si kastaba haddii ay jirto arrin fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana soo diraynaa farsamo-yaqaan si uu u soo qiimeeyo xaaladda qolka lama-daayada. Waxaan ku wargelinaynaa maamulaha dhismahaaga wixii arrimo ah ee ah in laga hadlo si loo xaqiijiyo qol lama-daayo nadiif ah, oo badbaadsan ee kugu habboon.

Makiinadiina waxay waxyeelaysay dharkeyga. Maxaan sameeyaa?

Fadlan wac 1-800-561-1972 kadibna soo sheeg dhibaatada. Waxaan soo diraynaa farsamo-yaqaan si uu u baaro labaduba alaabta waxyeelowdey iyo makiinada keenaysa waxyeelada la tuhunsan yahay. Wuxuu u baahanayaa in uu arko dharka marka hore, sidaas awgeed fadlan waa in aad joogtaa marka farsamo-yaqaanka adeegga uu imaado ama kaga tag dharka maamulaha/qofka maamula dhismaha.

Haddii farsamo-yaqaanka uu go'aamiyo in waxyeelada soo gaartey dharka aysan keenin shaqayn la'aanta makiinada, ma soo qaadayo dharka. Haddii farsamo-yaqaanka uusan go'aamin Karin waxa keenay waxyeelada, markaasi waxaan ku siinaynaa foomka xaqsheegasho dhar si aad u soo buuxisid wuxuuna dharkaaga dib ugu soo celinayaa xafiiskeena si baaritaan

dheeraad ah loogu sameeyo. Dharka waa in la qalajiyo kahor inta aanan la soo qaadin.

Xaqsheegashada nidaam ayaa la marinayaa ayadoo lagu saleynayo da'da, xaaladda, iyo qiimaha la qiyaasey ee dharka. Nidaamka wuxuu qaadanayaa laga bilaabo 2-4 toddobaad si uu u dhammaado. Xaaladaha qaarkood, haddii waxa keenay waxyeelada aanan la go'aamin Karin, dharka waxaa loo dirayaa shaybaar baara marada dharka.

Waa maxay sababta ay u kororto sicirka lama-daayada dhismaheena?

Kororka ayaa la dhaqan geliyay si aan u hubsano in aan sii wadi karno siinta dhismahaaga adeegyo iyo qalab dabakhada koowaad ah. Waxaan hubaa in aad ka warheysid jiritaanka korar sii socda oo ku yimaadey qiimeha korontada iyo biyaha. Kuwani waxay saameeyn ku yeesheen qiimaha bixinta adeegyada lama-daayada ee tayada leh.

Isticmaalka Habboon ee Saabuunta

Saabuunta wax intee le'eg ayaan isticmaalaa?

Waxaa jira laba nooc oo kala ah qasaaladaha – kuwo dharka kore laga soo geliya iyo kuwo dhanka hore laga soo geliya waxaana jira noocyo kala duwan oo badan oo ah saabuunta lama-daayada oo la heli karo.

Haddii aad isticmaalaysid makiinadaha dharka dhaqa ee xaga hore dharka laga soo geliya, waa in aad isticmaaleysid saabuunta 'saameynta badan leh' ama saabuubta HE. Waxaa si gaar ah loogu soo cabbiraa cabbir yar oo xumbo ah oo u oggolaanaya wax dhaqid fiican tayo sare leh oo xumbo yar. Ka eeg calaamadda HE ee ku taala weelka saabuuntaada. Haddii aad isticmaalaysid makiinada dhanka hore dharka laga soo geliyo aadna haysan saabuunta HE, fadlan hubso in aad isticmaashid in aana ka badanayn ¼ koob oo ah saabuunta caadiga ah.

Ayadoon la tixgelinaynin nooca saabuunta ee aad dooratid, mar kasta raac tilmaamaha cabbirka ee soosaaraha. Xusuusnow – in wax badan aysan fiicnayn! Saabuunta waxay si joogto ah ugu imaataa, mid aan barxanayn iyo qaab aan barxanayn oo ah 2X ama 3X. Aad ayay muhiim u tahay in la oggaado kala duwanaanshaha iyo in la isku hagaajiyada caddadka saabuunta la isticmaalay. Saabuun badan waxay keenaysaa in dharka si liidata loo biyo raacsiiyo taas oo sababi karta cuncun maqaar. Xumbada oo badata waxay sidoo kale keeni kartaa in qasaaladda ay danto.

Natiijada ugu fiican, isticmaal mashiinka wax diyaarsan u bixiya sida otomaatiga ah ee ku kor yaala makiinada. Haddii aad isticmaalaysid qasaaladda dharka kor looga soo rido, ku dar saabuunta iyo/ama si toos a weel ugu soo dar warankiilo kadibna dhawr daqiiqadood ha qasanto kahor inta aadan ku darin dharka.

Lacag-celinada

Waxaan khasaarey lacag anigoo isticmaalaya makiinadiina. Farsamo-yaqaanka adeegga ee Coinamatic ma isiin karaa lacag-celin?

Maya. Badbaadada farsamo-yaqaanadeena awgeed ma qaadaan ama ma heli karaan lacag caddaan ah. Wakiiladeena Adeegga Macmiilka luuqadaha badan waxay ku farxayaan in ay kugu caawiyaan lacag-celinta. Fadlan Wac 1-800-561-1972.

Waan guurayaa. Ma u soo celin karaa kaarkeyga garashada leh si lacag-celin la iigu sameeyo?

Haddii aad qorsheynaysid in aad guurtid, fadlan hubso in aad ku soo shubatid caddadka lacagta ee aad isticmaali doontid kahor guuritaankaada ayadoo aanan lacag-celin laguugu sameynaynin qiimaha aanan la isticmaalin Maamulaha Dhismahaaga ama qofka mas'uulka ka ah. U soo celi kaarkaaga Maamulaha Dhismahaaga marka aad soo celinaysid furaha dhismahaaga.

Waxaan idin ku leeyahay deyn lacag-celin oo aan wali la isiinin. Sideen u oggaan karaa xaalka jira?

Fadlan wac 1-800-561-1972 waxaana ku farxaynaa in aan eegno xaalka jira ee lacag-celintaada.

Waxaa iga lumay jeegeyga lacag-celinta. Ma heli karaa mid kale?

Waxaan soo saari karnaa joojinta lacag-bixinta ee lacag-celintaada asalka ah waxaana ku siin karnaa mid cusub. Fadlan Wac 1-800-561-1972.

Jeegeyga lacag-celina waa mid waqtigiisa la soo dhaafey. Ma heli karaa mid beddel ah?

Waxaan soo-saari karnaa joojinta lacag-bixinta ee lacag-celintaada asalka ah waxaana ku siin karnaa mid cusub. Fadlan Wac 1-800-561-1972